

MACLUUMAADKA ADIGA OO U DHEXEYYA 12 IYO 16 SANO JIR

DIIWAANGELINTA NORWAY EE RHEUMATOLOJYKA CARRUURTA (NOBAREV) OO AY LA SOCOTO BIOBANK

MAXAA LA IGU WEYDIYAY OO MAXAY TAHAY MACNAHA DIIWAANGELIGA?

Tani waa macluumaadka adiga kugu saabsan oo ku saabsan diiwaanka la yiraahdo Diiwangelinta Norway ee Rheumatology-ga Carruurta (NOBAREV) kaas oo leh "bangi noole" oo xiriir la leh halkaasoo aan ku qaboojinno shaybaarrada dhiigga iyo wixii la mid ah. Waxaad xogtan u helaysaa sababtoo ah waxaad qabtaa cudurka laabotooyinka iyo sababta oo ah waalidkaa ayaa la waydiiyay haddii ay ogol yihiin in aan diiwaan-gelinno macluumaadka adiga iyo cudurkaaga ku jira diiwaankan iyo annaga oo ku kaydsanayna muunadahaaga bangigan biobank. Carruurta iyo dhalinyarada qaba cudurka rheumatology ee Norway oo dhan waxaa laga codsanayaa inay ka qaybqaataan. Diiwaanku waa in uu gacan ka geystaa in daawaynta carruurta cudurradan oo kale ah ee Norway jooga ay u noqoto mid wanaagsan intii suurtoagal ah iyo sida ugu macquulsan ee dalka oo dhan. Waxaa ka mid ah in diiwaanku warbixin guud ka bixin doono inta qof ee cudurkan Norway ku nool, sida daawadu u shaqeyso iyo sida ay wax uqabanayaan dadka qaba cudurkan. Diiwaanka bangiga noolaha ayaa sidoo kale suurtoagal ka dhigaya in la baaro cudurrada.

MAXAA DHACAYA HADDII AAN KU BIIRTO DIIWAAN GELIN?

Haddii aad ku biirto NOBAREV, waxaanu diiwaan gelin doonaa magacaaga iyo lambarkaaga dhalashada, macluumaadka ku saabsan ogaanshaha, sida uu u firfircoon yahay cudurku, haddii aad qabto cudurro kale, daawooyinka aad qaadatao iyo natiijooyinka ka soo baxa baaritaanka dhiigga iyo ultrasound. Adiga iyo mid ka mid ah waalidkaa waxa kale oo lagu waydiin doonaa inaad buuxiso xogwaraysi ku saabsan waxa uu yahay xanuunka rheumatology, xanuunada ku haya iyo sida aad tahay. Baadhitaanadu waxay u dhici doonaan gabi ahaanba sidii jeeg caadi ah. Xitaa haddii aad ku biirto diiwaanka, ma jiri doono baaritaanno kale ama baaritaanno kale oo aan ahayn waxa uu takhtarku u maleynayo inay lagama maarmaan u tahay xanuunkaaga.

MAXAA KU SAABSAN BIOBANK?

Haddii lagu qabanayo baaritaanka dhiigga ee isbitaalka, waxaan dooneynaa inaan kaydinno dhiig dheeraad ah oo lagu qaboojiyo. Tani waxay la micno tahay in la qaado 1-2 dhalo oo dheeraad ah marka loo eego inta caadiga ah, laakiin badanaa ma keento in mar kale lagu mudo irbadda. Waxaad heli kartaa kareemka suuxdinta kahor inta aan dhiigga lagaa qaadin. Haddii sidoo kale lagu samaynayo baaritaanka dheecaanka kala-goysyada oo dheecaankaas uu wax ka hadho kadib marka baaritaannada loo baahan yahay la sameeyo, waxaan sidoo kale dooneynaa inaan wax ka kaydinno qaboojiyaha. Tani waxay noo sahlayaa inaan dib dambe u baadhno walaxdan oo aan wax badan ka baranno cudurka ku haya.

MAXAAN KA HELAA KU BIIRKA DIIWAANKA?

Lama hubo inaad adigu si toos ah uga faa'iidayaan doonto ka-qaybgalka, laakiin muddo fog waxay caawin kartaa carruurta iyo dhallinyarada kale ee qaba isla cudurka adiga kugu haya. Waxay qaadanaysaa waqti yar inaad buuxiso foomamka su'aalaha, qiyaastii 15-20 daqiiqo, laakiin taas waad samayn kartaa inta aad sugayso inaad gudaha u gasho dhakhtarka, tusaale ahaan.

MAXAA KU DHACAYA JAWAABAHA AAD SIISAY IYO MAXAAN KA BARANAYNAA?

Daraasadaha, macluumaadkaaga waxaa lagu kaydin doonaa adigoo magac iyo lambarka dhalashada lahayn. Kood ayaa kugu xiriirinaya adiga iyo macluumaadkaaga iyadoo loo marayo liis magacyo ah. Tani waxay la micno tahay in kaliya shaqaalaha ka shaqeeya diiwaanka ay heli karaan cidda laga helay macluumaadka iyo muunadaha dhiigga.

KU BIIRITAANKA DIIWANGELINTA WAA IKHTIYAARI

Haddii aadan hubin inaad ka qayb qaadanayso diiwaanka, kala hadal waaliintaada arrintaas. Haddii aadan rabin inaad ka mid noqoto, weli waxaad heli doontaa daryeelka iyo daawaynta caadiga ah ee aad isbitaalka ku heli jirtay. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, waxaad waydiin kartaa kalkaaliso ama dhakhtar isbitaalka ka shaqeeya. Ama waxaad la xiriiri kartaa lataliyaha diiwaanka, Berit Myhrmoen, taleefanka: 22029418 / iimaylka: bermyh@ous-hf.no, ama dhakhtarka mas'uulka ka ah diiwaanka, Helga Sanner, iimaylka: helsan@ous-hf.no. Wixii faahfaahin dheeraad ah, eeg bogga macluumaadka ee NOBAREV; sawir QR-koodhka.



Tolkenett AS
Schweigaardsgate 12
0185 Oslo
Org. nr. 993 965 294
www.tolkenett.no

TOLKENETT
Emilie Breddle